

WARBIXINTA GANACSIGA BILLAHA AH EE GOOBJOOG FM.

(BISHA May, 2015)

1.0 HORDHAC.

Tani waa warbixin bileedkii ganacsi ee Goobjoog FM aad bil kastaa uga barateen iney soo gudbiso, warbixintan ayaan diirada ku saarnaa dhaqdhaqaaqa ganacsiga bil walba koror iyo hoos u dhac wixii ku yimaada, gaar ahaan sarifka lacagaha qalaad sida uu ahaa iyo isbedbedelka ku dhacay sarifka lacagaha ma daganayaasha ah loo yaqaan.

Waxaan had iyo jeer xog aruurintan xoogga ku saarnaa sarifka lacagaha madaganayaasha ee loogu isticmaalka badan yahay suuqyada aduunka gaar ahaan dalkeena, sida Doolarka, Bownka, Yuuraha, Dirhamka, Riyaalka Sacuudiga, Birta Itoobiya, Shillinka Kenya iyo Shillin Soomaaliga.

Si kastaba xog aruurinta sarifka lacagaha qalaad ee kor xusnay waxay daaha ka rogeysaa isbedbedelka laga dareemay lacagaha madaganayaasha ah marka loo eego heerarkooda qabashada iyo bixinta .


Haddab, bishii tagtay ee 5'aad , diyaarinta warbixinta waxaa lagu saleeyay xogo laga soo uruuriyay dhaqdhaqaaqa suuqyada magaalada Muqdisho ku yaala, dabadeed xog aruurintaan soo bandhigideeda waxaa lagu muujiyay shax garaafeed kala tusmeeya tirada. Sidey ugu fududaato qof walba fahamkeeda bisha tagtay isbedbedelka ku dhacay qiimaha sarifka lacagaha qalaad, taasoo aan si gaara ugu eegi doono qoraalka soo socda qiimaha lacag walba la sarifay iyo gaarkeeda.

1.1 Doolarka Maraykan iyo Lacagta shilinka soomaaliga. Sosh/\$(100).

Doolarka Maraykanka ayaa ah Lacagta loogu adeegsiga badan yahay guud ahaan Soomaaliya, inta badan Doolarkuna waa kan haga dhaqdhaqaaqa ganacsiga Soomaaliya , oo sidoo kalana waa kan jaan-gooya qiimaha lacag kastoo qalaad lagu sarifo suuqyada caasimada Muqdisho. Haddaba, horaantii bishii 5'aad ee sanadkan Suuqayada lacagaha lagu sarifo qalaad ee magaalada

Muqdisho \$ 100 waxa uu ku furmay qabashada gacanta hore 2,250,000 Sosh oo heerka qabashada ah iyadoo lagu bixinayay gacanta labaad 2,260,000 Sh.So, Markii la soo gaaray Bartimihii basha ayuu sameeyay dhaqaaq iyadoo xiligaasi uu marayay heerka qabashada 2,270,000 Sh.Som iyo 2,280,000 Sh.So heerka bixinta. Bisha 20 keedii ayuu xoogaa soo hoobtay, hayeeshee dabayaaqadii Bisha ayuu halkiisii ku laabtay.


Ugu danbeyntiina, waxa uu ku soo xirmay 2,280,000 oo gacan hore ah iyo 2,270,000 Sh. So. Sida aad uga Jeedaan jaantuska hoos ka muuqda



1.1 Bownka iyo Doolarka \$/£ (100).

Lacagta bownka waa mid ka mid afarta lacagood ee igu saameynta badan suuqyada dunida islamarkaana qiimo ahaan ugu qaalisan , inkastoo laga leeyahay dalka Ingiriiska hadana waxay ka mid tahay lacagha qalaad ee lagu sarifo suuqyada magaalada Mugadisho .

Inkastoo bishii 5' aad lacagta bownka aanan wax isbadal laga dheehan si aad ku milicsaneysaa garaafka hoos adinkaga muuqda .




1.2 Yuuraha iyo Doolar USA/EURO (100).

Lacagta Yuuraha waa lacagta ay ku mideysanyihiin in yar mooyee guud ahaan wadamada qaarada yurub dhaca, isla markaana waxay ka mid tahay lacagaha ugu qaalisan dunida qiimo ahaan.

Yuuraha hadana waxay ka midtahay lacagaha lagu kala bedasho suuqyada Mugadisho inkastoo aanay saameyn xoogan u laheyn sida doolarka oo kale.


Hadii aan dib u qooraansado isbedbedelkii ku yimid lacagta yuura ah bishii May, 2015 waxaa ku yimid isbadal kooban .

Horaantii bishii Maarso , waxuu €100 uu ahaa heerka qabashada gacanta hore \$105/ € 100 halka heerka bixinta uu ka ahaa \$106 / € 100. Hase yeeshee, Mar qura ayay koror sameysay iyadoo markaas ay heerka qabasha ay aheyd \$105/€100, iyo \$106/€100 oo ah heerka bixinta. ah , sida ku cad shaxda hoose ee 1.3.




1.4 BIRTA ITOOBIYA IYO DOOLARKA \$/ETB (100).

Birta itoobiya waa mid ka mid lacagaha ugu qadiimsan ee laga isticmaalo qaarada afrika , bisha May inaba wax isbadal ah oo lacagtaasi la soo gudboonaaday malahan, 100 bir lagu bedelayay \$4 halka bixintiisana ay ahayd \$5 .




1.5 RIYAALKA SACUUDIGA IYO DOOLAR (USD/SAR).

Lacagta riyaalka sacuudiga waxay ka mid tahay lacagaha laga adeegsado dunida carabta gaar ahaana wadanka Sacuudi Carabiya islamarkaasna lagu sarifo suuqyada sarifka magaalada muqdisho. Si aad ka dheehanaysaan Sawirka hoos ka muuqda ma jirin inaba wax isbadal oo soo wajahay lacagtan Riyaal taasina waxay sariflayaashu la xariiriyeen dalka sacuudiga oo lacagtaasi laga leeyahay uu wadan ay xisiloon tahay siyaadiisa dhaqan dhaqaale .



1.6 Kenya Shillin iyo Doolarka maraykan (\$/KSH) (1000).

Kenya shillin oo ah lacagta dalka kenya laga adeegsado islamarkaana lagu sarifo suuqyada muqdisho ayaa bishii ina soo dhaaftay aysan wax iska badalay . Sida aad sawirka hoos ka muuqda aad uga jeedaan .



1.7 Dirham iyo Doolarka USD/UED(100).

Dirhamka oo ah mid ka mid ah lacagaha laga isticmaalo dalalka carabta ayaa inaba bishii tagtay
aanan wax isbedal ah sameyn taasina waxa sabab u ah lacagta dirham ee xisiloon madaamada
dalka laga leeyahay uu yahay mid siyaasadiisa lacagta ay mid dagan . sida aad uga jeedaan
jaantus1.7 .